Isbeddellada Guud ee Ugu Muhiimsan

Toddobaadka dhexdiisa, hawlo bani'aadamnimo oo ka socdey gobolka Jubbada Dhexe ee Soomaaliya ayaa la hakiyey. Arrintan ayaa waxa ay ka dambeysey ka dib markii xafiisyada dhowr NGO oo caalami ah ay xoog ku soo galeen Al Shabaab oo halkaa ay ka qaateen qalab, kombuyutarro, iyo furayaal xafiisyo iyo bakhaarro.

Xaaladda Muqdisho ayaa degganeyd muddada warbixintan marka laga reebo weeraro goosgoos ah oo lagu qaadayey xarumaha ciidamada dowladda. UNHCR ayaa ku soo warantey in ku dhowaad 57,000 oo qof ay barokaceen ilaa 1dii Luulyo 2009ka, kuwaas oo 21,000 ka mid ahi ay ku qaxeen isla Muqdisho dhexdeeda. 36,000 oo qof ayaa lagu soo warramey in ay aadeen qaybo kale oo dalka gudihiisa ah.

Toddobaadka Naas-nuujinta Caalamiga ah ayaa la xusay 1-7 Agoosto, iyada oo hal-ku-dhegguna ahaa 'Naasnuujintu, waa Waxqabad Degdeg ah oo Muhiim ah". Dalka Soomaaliya, laba cunsur oo ka mid ah kuwa ka qaybqaata nisbooyinka sarreeya ee nafaqo-xumada guud oo ah 18.6 boqolkiiba (tan ugu hooseysa xaaladaha degdegga ah waa 15 boqolkiiba) ayaa ah daahinta bilaabidda naasnuujinta iyo isticmaalka caanaha carruurta loogu talogalay iyo caana-booraha oo lagu diyaariyey xaalad nadaafad-xumo. War-saxaafadeed ay soo saartey 31kii Luulyo, ayaa UNICEF ku sheegtey in naas-nuujinta barax-tiran ee lixda bilood ee ugu horreysa nolosha ilamaha ay ahaan lahayd mid ka mid ah waxqabadyada nafaha lagu badbaadiyo ee ugu taabogalsan ee ay heli lahaayeen kumanaan carruurta Soomaaliya ku nool, halkaas oo tobankii ilmoodba uu mid dhinto inta uusan sanad-jirsan. UNICEF ayaa ku dadaaleysa in ay soo abaabusho kheyraadkii lagu ballaarin lahaa dadaallada kor loogu qaadayo laguna taageerayo naas-nuujinta.

4tii Agoosto, ayaa Madaxa Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobey (UNHCR) uu booqdey xarada Qaxootiga ee Dhadhaab ee ku taalla Waqooyiga Bari ee Kenya isaga oo iftiimiyey dhibaatooyinka "qeyru-caadiga" ah ee Qaxootiga Soomaaliyeed wuxuuna bulshada caalamka ugu baaqey in gargaar dheeraad ah ay bixiyaan. Qaxootiga muddada dheer jooga ee ku dhow 300,000 ayaa degdeg ugu baahan in la wanaajiyo kaabayaasha ay ka mid yihiin nidaamyada biyo-qaybinta iyo in la ballaariyo adeegyada ay ka mid yihiin caafimaadka iyo waxbarashada. Celcelis ahaan 6,500 oo Soomaali ah ayaa bil kasta imanayey xerooyinka nuskii hore ee sanadka 2009ka, kuwaas oo culeys dheeri ah saarey kheyraadkii awalba yaraa.

Wadatashiyada gudaha dalka ka dhaca ee Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira (CAP) ee 2010ka ayaa toddobaadka soo socda, 10ka Agoosto ka dhici doona Hargeysa, Somaliland iyo 12ka Agoosto Garoowe, Puntland. Aqoon-is-weydaarsiyadan ayaa dib u eegi doona guulihii la gaarey 2009ka kana munaaqashoon doona baahiyaha iyo waxqabadka 2010ka iyada oo qorshayaasha lagu dhisayo xaalado la hal-abuurey oo dhici kara.

Waxqabadka

Toddobaadka dhexdiisa, WFP ayaa hawl baaritaanka nafaqada ah ku soo gabogabeysey degmada Afmadow, ee gobolka Jubbada Hoose. Ilaa 4,500 oo dad nugul ah, oo u badan carruur ka yar shan sano jir, haween uur leh iyo kuwo nuujinaya ayaa ka faa'iideysan doona 190 metrik ton oo cunto ah oo qayb ka ah barnaamijka quudinta dheeriga ah ee la beegsado. Baaritaan kale ayaa ka socda degmada Dhoobley ee isla gobolkaas. Bisha Agoosto, WFP waxa ay Barnaamijka Quudinta Dheeriga ah ee Soomaaliya ku gargaari doontaa ku dhowaad 70,000 oo qof.

Gobollada Baay iyo Bakool, ayaa WFP ka qaybisey 890 metrik ton oo hoos imaaneysey Barnaamijka Quudinta Dheeriga ah oo ay ka faa'iideysteen 76,500 oo qof, halka 256,000 oo qof loo qaybiyeyey 3,125 metrik ton oo cunto ah taas oo hoos imaaneysey barnaamijka Cunto Qaybinta Guud ee gobolka Hiiraan. Degmada Hobyo, ee koonfurta Mudug, ayaa 3,200 oo qof ay ka faa'iideysteen barnaamij quudinta guud ee dheeriga ah halka Puntland ay WFP iyo la-hawlgalaheeda *Danish Refugee Council* ay 1,638 metrik ton oo cunto ah ay 112,000 qof oo Dad Gudaha Ku Barokacay iyo saboolka magaalada ah ugu qaybiyeen Boosaaso iyo degaannada ku hareereysan.

Toddobaadka dhexdiisa, UNICEF ayaa dhammeystirtey dhismaha nidaam biyo-gelin oo dhererkiisu gaarayo 2 km si looga helo biyo la cabbo oo ammaan ah. Dhismaha ayaa waxaa sidoo kale ka mid ahaa haanta kaydka oo

qaadda 40 m^3 iyo 10 kaalimood oo biyaha laga dhaansado oo ay ka faa'iideysanayaan ilaa 16,900 oo Dad Gudaha Ku Barokacay iyo bulshada degaanka ee martigeliyey ee ku nool Kax Sheeqaal ee gobolka Banaadir ah. In ka badan 10,500 oo qof oo u badan Dad Gudaha Ku Barokacay oo dhowaan yimid, ayaa ka faa'iideysan doona 200 musqulood oo dhowaan laga dhisey xerooyinka Gubadleey, Xaaji Cabdi, Ceel-cadde, Ceel-macaan, Galgalato iyo Fiqi ee waqooyiga Muqdisho iyo 150 musqulood oo laga dhisey Kax Shiiqaal oo Koonfurta Muqdisho ku taalla.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org